

# Qorshayaasha Shaqo-geynta Degdegga ah ee DDA/DVR Guudmarka



*Shakhsiyaadka qaba naafonimooyinka koritaanka iyo caqliga waxay ku kobci karaan cududda shaqaalaha markay haystaan fursado ay ku heli karaan adeegyo iyo diyaafadin macquul ah gobolka oo dhan kuwaas oo ku habboon hibooyinkooda iyo baahiyadooda. Adeegyada Shaqo-geynta Degdegga ah ee DDA/DVR waxay gacan ka geystaan taageerada macaamiisha Maamulka Naafonimooyinka Koritaanka iyo Qaybta Tababbarada Mihnadeed si ay u helaan shaqo macne ku fadhida.*

DVR waxay u adeegtaa halka laga galo adeegyada shaqada, iyadoo diiradda la saarayo xalal muddo-gaaban oo loogu talagalay shaqooyin bulsho isku-dhaf ah guul leh, oo lagu tartamo. DVR waxay bixisaa adeegyo badan oo ay ka mid yihiin, hagid xirfadeed iyo la-talin, qiimeyn, taageerooyin shaqo, tababbar degdegga ah, adeegyada shaqo ku negaanshaha iyo shaqada ka-dib. DDA wuxuu bixiyaa maalgelin muddo-dheer soconaysa oo loogu talagalay macaamiisha in ay helaan taageero shaqo joogto ah oo loo marayo bixiyayaasha shaqada qandaraaska ah ee degmada.

Xaaladaha qaarkood, macaamiisha leh maalgelinta muddada-dheer ee DDA waxay raaci karaan dariiq gaar ah oo loo maro shaqada aan waafaqsanayn habka muddada-gaaban. Xaaladahaasi, adeegsiga maalgelinta DDA si loo helo shaqo oo goor dambe loola shaqeeyo DVR shaqada ka-dib ayaa lagu taliyay. Habkan wuxuu ku lug leeyahay Qorshaha Shaqo Geynta Degdegga ah ee DDA/DVR, oo oggolaanaya taageerada gaarka ah ee waqtiga debecsan.

Iyadoo dariiq shaqo raadinta DVR ee caadiga ah uu ku habboon yahay macaamiil badan, haddana tixgelinta iyo ra'yiga laga fikiray ee kooxda taageerada oo dhan ayaa aasaasi ah marka lagu talinayo Qorshaha Shaqo-geynta Degdegga ah ee DDA/DVR.

## **Bayaanka Maaliyadeed ee DVR:**

Maaliyadaha Gobolka iyo Kuwa Federaalka ayaa loo adeegsadaa bixinta Adeegyada DVR. Barnaamijka VR wuxuu qijaastii helaa boqolkiiba 78 oo Maaliyadaha federaalka ah iyo boqolkiiba 22 oo maaliyadaha gobolka ah. Si aad u hesho macluumaadka faahfaahsan ee qaddarta lacagta maaliyadaha Federaalka ee barnaamijka loogu talagalay, fadlan booqo: <https://rsa.ed.gov/fiscal/grant-awards>



# Kumaa igu caawin kara shaqada?

*Shaqo bixiyahaaga ayaa kugu caawin doonna tallaabo kastoo hannaanka ka mid ah. Waxaa maalgeliya ilo kala duwan waqtiyada kala duwan, oo ku xiran halka aad ka joogto shaqo raadintaada.*

## DVR

Qaybta Tababarada Farsamo iyo Kuwa Mihnadeed waxay bixinaysaa taageero muddo-gaaban oo kaa caawinaysa in aad shaqooyin isku-dayso, in aad shaqo hesho iyo in aad shaqadaada cusubi barato. Waxay kaloo bixiyaan shaqo la-talin, lacagta yunifoomka, hoyga, adeegyo nololeed oo madax-bannaan iyo taageerooyin kale oo kaa caawinaya in aad guuleysato.

## Adeegyada DDA iyo Degmada

Kooxda DD ee degmadaada waxay kormeeraysaa adeegyada uu bixiyay bixiyaha shaqada, hubinaysaa adeegyo tayadoodu-sarreeyso in la bixiyo waxayna gacan ka geysanaysaa maskax-shiilka iyo xallinta dhibaataada ee loo baahan yahay. Waxay kaloo oggolaan karaan Gargaar Farsamo Gaar ah haddii taageero dheeraad ah oo laga helay la-taliye ay kaa caawin karto guusha shaqadaada.

## Qorshayaasha Shaqo-geynta Degdegga ah ee DDA/DVR

Maamulka Naafonimooyinka Koritaanka wuxuu bixiyaa maalgelin muddo-dheer oo loogu talagalay shaqo bixiyahaaga si uu kaaga taageero in aad ku guuleysato shaqada iyo si aad u horumariso xirfadaada.

## Waa maxay dariiqa saxda ii ah?

*Waxaad arki doontaa dhammaan xubnaha kooxdaada bilow ilaa dhammaadka xirfadaada waqtiyo kala duwan.*

- Marka aad dooneyso in aad sahamiso noocyada kala duwan ee shaqooyinka ka jira bulshada.
- Marka aad dooneyso in aad raadiso shaqo cusub.
- Marka aad ku tababaranyso shaqo cusub.
- Marka aad ugu baahan tahay taageero muddo-gaaban ah shaqadaada.
- Marka aad u baahan tahay gargaar shaqo.

- Marka aad dooneyso in aad dhisto oo aad ku dhaqanto xirfadaha shaqada ka hor inta aadan shaqo raadsan.
- Marka aad u baahan tahay taageero joogto ah si aad u joogteyso guusha shaqadaada.
- Marka aad dooneyso in aad xirfadaada horumariso.
- Marka aad dooneyso in aad la shaqeyso la-taliye si aad u hesho taageero dheeraad ah.

- Marka aad dooneyso in aad la shaqeyso DVR iyo DDA/adeegyada degmada.
- Marka aad u baahan tahay xoogaa waqti dheeraad ah si aad u horumariso xirfadaha lagu isticmaalo shaqada.
- Marka aad dooneyso waqti dheeraad ah oo aad ku helayso shaqada saxda ah.
- Marka aad dooneyso waqti dheeraad ah oo aad ku falanqeynayso ikhtiyaaradaada xirfadeed.